



Jadeecada waa fayras neef-mareenka oo aad u faafa oo halis ah, gaar ahaan dhalaanka iyo ilmaha yaryar. Inta badan dadka ku nool Mareykanka iyo Vermont waa laga talaalay jadeecada, bulshooyinka leh cayiska tallaaf ee hooseeya ayaa halis sare ugu jira inuu dilaacitaanka cudurka. Jadeecada waay ku badan tahay wadamada qaar markaa iska hubi in lagaa talaalo jadeecada kahor inta aadan u safrin wadan kale.

Jadeecada waxay ka faaftaa neefta qof qaba.

- Fayraska jadeecada wuxuu ku nool yahay qofka cudurka qaba sankiisa iyo xabka dhuunta.
- Fayrasku wuxuu badanaa ku fidaa marka qof cudurka qaba uu qufaco ama hindhiso.
- Waad ku jiran kartaa haddii aad neefta qof cudurka qaba ama aad taabato goob fayraska leh, ka dibna aad taabato indhahaaga, sankaga ama afkaaga.
- Fayrasku wuxuu ku jiri karaa hawada ilaa laba saacadood.

Jadeecada waa mid kamid ah fayrasyada ugu faafitaank badan.

- Calaamadaha lagu garto waxaa ka mid ah qandho sare, qufac, diif, iyo casaan iyo indhaha oo biyo leh.
- Jariirico ayaa badanaa soo baxaan 3 ilaa 5 maalmood ka dib calaamadaha ugu horeeya.
- Qofka cudurka qaba wuxuu faafin karaa jadeecada xitaa kahor inta uusan ogaan inuu jiran yahay.

Talaalka jadeecada waa mid bdqab le oo aadna waxtar u leh.

- Laba qiyaasood oo ah talaalka jadeecada, bararka qaamamka, iyo ubeela (MMR) ayaa 97% waxtar u leh jadeecada.
- Carruurta waa inay qaataan laba qiyaasood oo tallaalka MMR ah - qiyaasta koobaad waa inay qaataan 12-15 bilood qiyaasta labaad waa inay qaataan 4-6 sano.
- Dhalaanka da'doodu u dhaxayso 6-11 bilood ee u safraya caalamka waa inay qaataan qiyaas hore ee talaalka MMR ugu yaraan laba todobaad kahor safarka.

Hubi in adiga iyo qoyskaaga aad si buuxda isaga talaashaan jadeecada.

- Dib u eeg diiwaanada talaalka adiga iyo qoyskaaga ama la hadal dhakhtarkaaga haddii aadan hubin ka hortaga jadeecada.
- Waa muhiim in laga hortago jadeecada kahor inta aanad u safrin goob ka baxsan Maraykanka.

Wac dhakhtarkaaga isla markiiba haddii aad u malaynayso inaad qabto jadeeco.

- Joog guriga oo ka fogow dadka kale intii suurtagal tahay.
- Xiro maaskaro wajiga haddii aad jiran tahay ama aad daryeelayso qof bukaan ah.
- Haddii aanad lahayn daryeel bixiye caafimaad, wac 2-1-1 si aad ula xiriirto daryeelka, ama la xidhiidh Xarunta Caafimaadka ee Dawlada dhexe ee kuugu dhow ama mid kamid ah Vermont's Free & Referral Clinics.

Ka hel macluumaad dheeraad ah barta HealthVermont.gov/Measles.